FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

## لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 14-aad. Garowe November 19, 2012** **Lam.11**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Sharciga wax ka bedelka Xeerka burcad badeeda Puntland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 18. ee 19/11/2012, kuna saabsan Sharciga wax ka bedelka xeerka Burcad badeeda Puntland.***

**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

ولاية بونت لاند الصومالية

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Sharci Lr.18 ee November 19, 2012, kuna saabsan Sharciga wax ka bedelka Xeerka Burcad badeeda Puntland.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/110/2012 ee 15/11/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga wax ka bedelka burcad badeeda Puntland .

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigan wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa Sharcigani dhaqan gelayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**GOLAHA WAKIILADA** | **HOUSE OF REPRESENTATIVES**

***Xafiiska Guddoomiyaha*** | ***Office of the Speaker***

***Ref:-*** **XGGW/DPL/ 110 /2012** **Garoowe, Khamiis** Date:- **15/11/2012**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Burcad-badeedka PL**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/ 229/2012 ee October 17, 2012 kuna saabsan wax ka bedelka Xeerka Burcad badeeda Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ee 06/11/2012 |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

Ansixinta wax ka bedelka Xeerka Burcad-badeedka Puntland.

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of House of Representatives
PUNTLAND STATE

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOMALIYA**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

---

# WAX KA BEDELKA XEERKA BURCAD BADEEDA DAWLADDA PUNTLAND

---

**Garoowe, November 15.2012**

2047

## Qodobka 1-aad
## Macneyn Burcadbadeednimo

Burcad-badeednimo waa fal-dembiyeed ku salaysan afduub, qafaalasho dad iyo gaadiid badeed.

## Qodobka 2-aad
## Aqoonsiga burcadbadeedka

Waxaa burcadbadeed loo aqoonsanayaa qof kasta oo kaga qeyb-qaata naftiisa, maalkiisa, gaadiidkiisa, hubkiisa iyo qalab kasta oo sahlaya qafaalashada gaadiidka badda.

## Qodobka 3-aad
## Awoodda dacwad-qaadista

Maxkamadaha Puntland ayaa awood u leh dhegaysiga iyo qaadista dacwadaha lidka ku ah eedaysanayaasha burcadbadeedda iyo la wareegidda hantidooda gaadiid, qalab, badeecad iyo wixii la mid ah.

## Qodobka 4-aad
## Qabasho-Gaadiid

1. Ciidanka ilaalada xeebaha Puntland waxay awood u leeyihiin in ay soo qabtaan gaadiid badeed ama diyaarad loo adeegsaday burcadbadeednimo iyo wixii hanti ah oo saaran, gaadiidkaas oo ku sugan ama ka baxsan badaha Puntland.
2. Ciidanka ammaanka Puntland waxay soo qaban karaan cid kasta oo ku xusan Qodobka 2-aad ee xeerkan.

## Qodobka 5-aad
## Gelid fal-burcadbadeednimo

Qof kasta oo ay ku caddaato inuu aasaasay, abaabulay, maalgaliyay, hoggaamiyey ama fuliyey falal-burcadbadeednimo kana hawlgalay badaha Puntland iyo kuwa caalamiga ah wuxuu gelayaa dembi culus, haddii aan falku keenin dembi intaa ka culus, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeye 5 ilaa 10 sano oo xarig ah iyo

ganaax u dhexeeya Sh.So 100,000,000 (boqol malyan oo shilin Soomaali ah) ilaa 200,000,000 (labo boqol malyan oo shilin soomaali ah) iyo hantida uu kaga qeybgalay ama ka kasbaday oo lala wareego.

## Qodobka 6-aad
## Gacansiin

Qof kasta oo burcad-badeed ku boorriya, u fududeeya, talo ama xog siiya, qariya ama kaga qaybqaata fal kasta oo kale oo gacansiin ah waxaa lagu xukumayaa xabsi u dhexeeya 1 ilaa 3 sano iyo ganaax gaaraya Sh.so 50,000,000 (kontan malyan oo shilin soomaali ah) ilaa 100,000,000 (boqol malyan oo shilin soomaali ah)

## Qodobka 7-aad
## Dayacaad

Kabtanka, sarkaalka ama ciddii kale oo mas'uul ka ah gaadiid-badeed ay leedahay Dawladda Puntland ama gaadiid-badeed laga leeyahay gobollada kale ee Soomaaliya ama uu shisheeye leeyahay oo gala fal-dembiyeed keeni kara dayac ay burcad-badeeddu kaga faa'iideysato, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhaxeeya 1 ilaa 3 sano.

## Qodobka 8-aad
## Ka-maqnaansho-dacwad

Maxkamaddu waxay awood u leedahay qaadista iyo xukun ka soo saaridda dacwadda qof kasta oo ku eedeysan fal-dembiyeed burcadbadeednimo oo ka maqnaaday dhageysiga dacwaddiisa laguna war-geliyey sida sharcigu qabo.

## Qodobka 9-aad
## Sarkaal Dawladeed

Sarkaal Dawladeed ama qof kasta oo lagu aaminay hawl guud oo sameeya fal lid ku ah waajibaadkiisa xafiiseed kaas oo sahla ama ka qeyb-gala fal burcad-badeednimo, qaata ama u qaada cid kale lacag ama hanti kale ama oggolaada ballan qaad burcad, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhexeeya 3 ilaa 8 sano iyo ganaax u dhaxeeya 150,000,000 (Boqol iyo kontan malyan oo shilin soomaali ah) ilaa 300,000,000 (Saddex boqol oo malyan oo shilin soomaali ah).

**Qodobka 10-aad**
**Xukunka Xabsiga**

Ciqaabta xarigga ah oo lagu mutaystay xeerkan lama gadan karo, Haddii xukumanuhu bixin waayo ganaaxa lagu xukumay waxaa loogu beddelayaa xarig u dhigma iyada oo la raacayo sharciga.

**Qodobka 11-aad**
**Burin**

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin sharcigan.

**Qodobka 12-aad**
**Dhaqan-galka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa 16 maalmood ka dib marka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

2050